QAYBTA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Su’aalaha Aalaaba La Iska Weydiiyo Hagista Dib u Furida

Isku-imaatinada, Kulamada Gudaha Dhismaha ee Bulshada

(La cusboonaysiiyey 8-20-2020)

Hoos waxaa ku yaala jawaabaha Su’aalaha Aalaaba la Iswaydiiyo (FAQs) ee ku saabsan Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) Hagista Gobolka oo Dhan ee Isku-imaatinada, Kulamada Bulshada ee Gudaha Dhismaha. OHA waxay bixisaa Su’aalahaan Aalaaba la Iswaydiiyo (FAQs) si ay gacan uga geystaan inay bulshada fahamto hagista, inay ka jawaabaan su’aalaha daneeyeyaasha, iyo inay xaqiijiyaan sida hagista u quseyn karto dhacdooyinka gaarka ah. Su’aalahaan Aalaaba la Iswaydiiyo (FAQs) waxaa la cusbooneysiin karaa muddo kadib. Su’aalaha Aalaaba la Iswaydiiyo (FAQs) looguma talagelin inay buuxiyaan booska hagista, laakiin waxaa loogu talagalay inay fasiraan, kaabaan, oo ka bixiyaan faahfaahino hagista.

S1: Fadlan ma ka bixin kartaa fasiraad ama tilmaan waxa loo yaqaano ‘isku-imaatinka bulsheed’?

J1: Isku-imaatinka bulsheed waa koox dad ah oo isugu yimid inay wax ka qabtaan arrin dadwaynaha walaac ku haysa, sida kulanka guddiga dugsi ama kulan lagu xogwaraysanayo saraakiisha dawladda.

S2: Haddii goob ku leedahay barxado gudaha iyo dibadda dhismaha, ma lagu qaban karaa isku-imaatino fara badan labada meeloodba iyadoo tirada ugu badan ee dadku ay joogayaan isku-imaatin kasta?

J2: Xaddidaadaha mugga ee ugu badan ayaa loogu adeegsan karaa goob kasta gaarkeeda haddii:

- kaqaybgalayaashu barxad kasta ayna istaabanayn, oo ay ku jirto inayna wadaagin musqulaha; *iyo*
- ay jiraan meelo laga soo galo iyo meelo laga baxo oo kala gaar ah isku-imaatin kasta.

S3: Waa maxay hagista dibadbaxyada?

J3: Dibadbaxyadu waa isku-imaatino dadwayne waana in la raaco mugga ugu badan ee isku-imaatinada marka la eego Wajiga degmadu ku jirto.

S4: Waa maxay hagista bandhigga khamiirinta cinabka halkaasi oo koox dad ah ay u lugaynayaan ganacsiyo kala duwan?

J4: Inta bandhigga khamiirinta cinabku socdo, kaqaybqaatayaashu waa inay raacaan Hagista Gobolka oo Dhan ee Isku-imaatinada,Kulamada Bulshada ee Gudaha Dhismaha. Haddii kaqaybqaatyaashu galaan ganacsiyo ay tahay in la raaco hagista OHA (tusaale ahaan, makhaayadaha ama tukaanada tafaariiqda), waa inay raacaan tilmaamaha khuseeya ganacsigaasi.

S5: Miyay xaddidnaanta isku-imaatinada ee 50 qof gudaha dhismaha iyo 50 qof dibadda dhismaha ka dhigan tahay 50 qof wadar ahaan?

J5: Haddii laba isku-imaantin oo kala duwan ay isku mar dhacayaan, mid gudaha dhismaha ka dhacaya iyo mid dibadda dhismaha ka dhacaya, isku-imaatin kasta wuxuu yeelan karaa ilaa 50 qof. Kaqaybgaleyaasha isku-imaatinada kala duwan waxa waajib ah inay is taaban, oo ay ku jirto inayna wadaagin musqulaha waana waajib sidoo kale inay isticmaalaan meelaha laga soo galayo iyo meelaha laga baxayo oo kala gaar ah.

Haddii ay jirto hal dhacdo oo dhacaysa taasi oo leh xarumo gudaha iyo dibadda ah, waa inayna 50 qof wax ka badan ayna joogin goob kasta wakhtigiiba.

S6: Waa maxay xaddidaada tirada isku-imaatinka tacsiyaha?

J6: Wajiga Koowaad, xadka mugga ugu badan ee isku-imaatinku waa 50 qof gudaha dhismaha, 50 qof dibadda dhismaha. Wajiga Labaad, xadka mugga ugu badan ee isku-imaatinku waa 50 qof gudaha dhismaha, 100 qof dibadda dhismaha. Wajiga Labaad, haddii tacsi ka dhacayso madal ama goob munaasabad (oo cunto la bixinayo, la wadaagayo tas'iilaadka, iwm.), Hagista Wajiga Labaad ee Hagista Madasha iyo Munaasabada ayaa la adeegsan doonnaa (oo u oggolow ilaa 100 qof gudaha dhismaha iyo 250 qof dibadda dhismaha, laakiin 250 wax ka badan lama oggola).

S7: Madalada Wajiga Labaad waxa loo oggol yahay 100 qof gudaha dhismaha ama 250 dibadda dhismaha, laakiin sidoo kale waa inay raacaan amarka Isku-imaatinada, kaasi oo dhigaya 50 qof gudaha dhismaha ama 100 qof dibadda dhismaha. Ma sii faahfaahin kartaa?

J7: Xadka mugga ugu badan ee ku sheeggan Hagista Gobolka oo dhan ee Isku-imaatinada, Kulamada Bulshada ee Gudaha Dhismaha ma khuseeyaan isku-imaatinada ama kulamada bulsheed ee gudaha dhismaha ee ka dhacaya goob ay dabooshay hagis kale oo ah Hagista Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ee waaxda u gaarka ah, maadaama goobahan ay leeyihiin xadka mugga ugu badan oo ah mid u gaar ah iyo xayiraado kale. Waaxo gaar ah oo ay shagista OHA khuseyso waxaa ka mid ah, laakiin kuma koobna madalada, makhaayadaha iyo baararka, goobaha tafaariiqda, iyo xarumaha madadaalada gudaha iyo dibadda dhismaha, hay'adaha waxbarashada sare, dugsiyada, iyo barnaamijyada daryeelka ilmaha.

S8: Miyaa aroosyada loo tixgalinayaa inay yihiin kulamo bulsheed ama isku-imaatino ka dhacayo gudaha dhismaha?

J8: Aroosyadu waa isku-imaatino waxaana waajib ah in la raaco xadiga isku-imaatinka ugu badan ee Wajiga ay degmadu ansixisay. Haddii arooska lagu qabanayo madal ku taala degmada ku jirta Wajiga Labaad, markaa aroosku waa inuu raaco Hagista Wajiga Labaad eeHawlwadeenada Madasha iyo Munaasabada. Wajiga Koowaad, aroosyada waxa waajib ah inay raacaan Hagista Isku-imaatinada iyo Kulamada Bulsheed ee Gudaha dhismaha.

S9: Miyay tahay dugsiyadu inay raacaan hagista isku-imaatinada OHA?

J9: Maya. Dugsiyada waxa waajib ah inay raacaan Hagista Dugsiyo Diyaar ah,Arday Badqabto ee Waaxda Waxbarashada ee Oregon Sannad-Dugsiyeedka 2020-21.

S10: Miyay tahay kiniisaduhu inay raacaan hagista isku-imaatinka marka ay qabanayaan adeegyada caadiga ah, mase raaci karaan hagista madasha iyo munaasabadaha?

J10: Kaniisadaha ku yaala degmooyinka ku jira Wajiga Koowaad waxa waajib ah inay raacaan Hagista Gobolka oo dhan eeIsku-imaatinada, Kulamada Bulshada ee Gudaha Dhismaha ee loogu talagalay adeegyada caadiga ah. Kiniisadaha ku yaala degmooyinka Wajiga Labaad ku jira waxay raaci karaan Hagista Wajiga Labaad ee Hawlwadeenada Madasha iyo Munaasabadaha ee loogu talagalay adeegyada caadiga ah.

S11: Hagistee ayay tahay inay raacaan kulamada soo kabsiga faca (tusaale ahaan, Alcoholics Anonymous) marka lagu jiro Wajiga Koowaad iyo Wajiga Labaad?

J11: Kulamada soo kabsiga faca waa inay raacaan laba nooc oo hagis:

1. Hagista waaxda OHA, haddii lagu dabaqi karo, iyadoo laga duulayo goobta kulanka. Tusaale ahaan, kulamada ka dhaca guriga qofka waxaa waajib ah in la raaco hagista kulamada bulshada ee gudaha dhismaha. Kulamada ka dhaca kiniisad waxaa waajib ah in la raaco hagista Wajiga Koowaad ee isku-imaatinada iyo hagista Wajiga Labaad ee madasha iyo munaasabada. Waxaad ka heli kartaa liiska waaxo kala duwan kuwaasi oo goobuhu ay hoos iman karaan halkan.

2. Hagista Gobolka oo Dhan ee Isku-imaatinada, Kulamada Bulshada ee Gudaha Dhismaha.

S12: Miyay hawlwadeenada qolka ciyaaraha, sida poker, bunco iyo bingo, ay tahay inay raacaan hagista isku-imaatinada ama kuwaani ma yihiin kulamo bulsho oo ka dhaca gudaha dhismaha?

J12: Haddii hawlwadeenka qolka ciyaarta uu qabanayo ciyaaraha poker, bunco ama bingo, kuwaan loo tixgalin maayo kulamo bulsho oo ka dhaca gudaha

dhismaha. Sidaas darteed, Hagista Gobolka oo Dhan eelsku-imaatinada, Kulamada Bulshada ee Gudaha Dhismaha ayaa lagu dabaqi doonnaa. Qololka kaarar qabiileedka ahayn ee degmada ku jirta Wajiga Labaad ee ku yaala madal ama makhaayad ama baar, tusaale ahaan, hagista waaxda u gaarka ah ayaa khusayn doonta.

S13: Waa maxay hagista ururrada caqiidada ay raacayaan si ay u xaddidaadaan isku-imaatinka? Miyaa kulan ka dhaca Elks Lodge loo tixgalinayaa kulan bulsho oo ka dhaca gudaha dhismo?

J13: Kulan ka dhaca Elks Lodge ma aha kulan bulsho oo ka dhaca gudaha dhismo waxaana waajib ah in la raaco xaddidaadaha mugga ee ugu badan Hagista Gobolka oo Dhan eelsku-Imaatinada, Kulamada Bulshada ee Gudaha Dhismaha ee degmada uu Hoyga ku yaalo.

Haddii urur caqiido uu ka hawlgalo adeegyada cuntada iyo khamriga, waxaa waajib ah sidoo kale inuu raaco hagista Makhaayadaha iyo Baararka ee Wajiga Koowaad ama Wajiga Labaad ee degmada uu ku yaalo.

S14: Waxa jira xaddidaad ku qoran kulamada bulshada ee gudaha dhismaha. Ma jiraa xaddidaad kulamada bulshada ee dibadda dhismaha?

J14: Koox dad ah oo dibadda u jooga, ujeeddo kasta, waa isku-imaatin waana inay raacaan xaddidaadda mugga ee lagu sheegay Hagista Gobolka oo Dhan ee Isku-Imaatinada, Kulamada Bulshada eeGudaha Dhismaha

Helida dokumintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsoha.state.or.us.